Qofka Muuminku wuxuu ku gaaraa akhlaaq wanaagiisa darajada qofka Sooman ee Salaad u taagan

Caa'isha Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inay tiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Qofka Muuminku wuxuu ku gaaraa akhlaaq wanaagiisa darajada qofka Sooman ee Salaad u taagan".
[Xadiis Saxiix ah, marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] [Waxaa Wariyay Abuu Daa'uud iyo Axmed]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in akhlaaq wanaagu ay Qofka gaarsiiso darajada Qofka si joogto ah Maalintii u Sooma Habeenkiina Salaad u taagan, akhlaaq wanaaga waxaa lagu soo ururiyey: Gacan furnaanta, hadal wanaaga, waji furnaanta, joojinta dhibka iyo dadka oo uu u dulqaato.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5799